

**Xeer-Sharci 9 Oktoobar 1961. lamba. 5.**

**Wareejinta Waaxda Shaqaalaha iyo Waaxda Adeegyada oo loo wareejinayo Guddoonka Golaha Wasiirrada**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay qodobka 63, ee Dastuurka;

Markuu arkay sharciga 16 Agoosto 1961, lamba. 19 “dhismaha Xukuumadda - tirada Wasiirrada”;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in, sí ku meel gaar ah, lagu dhaqaaqo wareejinta Waaxda Shaqaala iyo Waaxda Adeegyada iyo waajibaadka la xiriira, laguna wareejiyo Guddoonka Golaha Wasiirrada:

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Asaga oo ka ambaqaadaya soojeedinta Wasiirka Kowaad;

**WUXUU XEERINAYAA**

**Qod. 1**

Ilaa laga soo saarayo Sharciga Nidaamka xda Shaqqaha iyo Waaxda Adeegyada, oo horey qayb uga ahaa Wasaaradda Arrimaha Guud iyo waajibaadka la xiriiraba, waxaa loo wareejinayaa Guddoonka Golaha Wasiirrada.

**Qod. 2**

Xeerkan, oo saameyn yeelanaya laga bilaabo 5<sup>ta</sup> Agoosto 1961, waxa la horgeynayaa Golaha Xeedejinta (Shacabka), sí loogu rogo sharci.

Muqdisho, maata oo taariikhdu tahay 9 Oktoober 1961.

**Aden Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Wuu arkay wuuna Diiwaangeliye –

Diiw. Lr. 9, xaashi lamba. 23.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1961.

Ku-xigeenka Hantidhowraha: **Cali Axmed Cumar**